

**UJEEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"**

**Maanta** oo ay taariikhdu tahay **05/02/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

<b>WAKAALAD BIXISO:-</b> KADIJO AHMED MOHAMED, Hooyo Fadumo Maxamed Nur, Somali ah, Ku Dhalatay Kismaayo, Sanadkii: 1960-07-02, Sidata Somali Passport, Lr. P01524099	<b>LA WAKIISHE:-</b> IFRAH MOHAMED NUR, Hooyo Khadijo Axmed Maxamed, Somali ah, Ku Dhalatay: Kismaayo, Sanadkii: 1987-10-08, Degan Wardhigleey, Sidata Somali Passport, Lr. P01603554
<b>TILMAAMAHA NUS BOOSKA</b> Nus Boos Banaan oo Ku yaal: <b>Muqdisho</b> , Degmada: <b>(Dharkeynley)</b> , Cabirka: <b>(20X10-Mt)-M</b> , Looto No: <b>0160-UZ</b> , W.M.L: <b>(Ref.7470/010)</b> , <b>Tr. 19/01/2010</b> , Kana Soo Baxay Nootaayo Banaadir, Uuna Saxiixay Dr. C/raxmaan Max'uud Cali (Timacadde)	<b>SOOHDINTA DHULKA</b> Bari: dhul dad, Koonfur: dhul dad, Galbeed: dhul dad, waqooyi <b>jid</b> , waana qeybta xigta bari

**B-** Aniga oo ah **KADIJO AHMED MOHAMED**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Gabadheyda **IFRAH MOHAMED NUR** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Nus Booska Tilmaamihiisu Sare Ku Xusan yihiin, in Nus Booskaas ay gadi karto, Wareejin Karto, Hibeyn karto, dhisi karto, ijaari karto, u dacwoon karto, qareen u qaban karto, uguna doodi karto Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **IFRAH MOHAMED NUR** awoodaas aan siiyay ay u madax banaan tahay oo aniga Nus Booskaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

**T-** Aniga oo ah **IFRAH MOHAMED NUR**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey Hooyadeey **KADIJO AHMED MOHAMED**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

**SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA**  
KADIJO AHMED MOHAMED

**SAXIIXA LA WAKIISHAHA**  
IFRAH MOHAMED NUR

1- ALI MOHAMED ABDULLAHI  
Ali

2- MAHAMUD ABDI DORE  
MA

**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

**REP. 1383/T.P.N/25, Tr. 05/02/2025**, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- KADIJO AHMED MOHAMED** Ahna (Wakaalad Bixiye), **2- IFRAH MOHAMED NUR** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



**NOOTAAYAHA**  
**Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**

*(Handwritten signature of Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo")*









## Jamhuuriyadda Soomaaliya

Ujeeddo: Heshiis kala gadasho Dhul Bannaan.

Date: 19/01/2010

Muqdisho manta oo ay taariikhdu tahay 19/01/2010 Anigoo ah Cumar Xuseen Axmad Soomaali ah, Hooyadey tahay Faadumo Cusmaan, Ku dhashay Xamar Sannadkii 1959dii, Degan Xamar Lehna (siwir Dhegan W/A/ Lifaqaan), waxaan Cadeynayaa in aan Iska gaday Dhul Bannaan oo aan ku leeyahay degmada Dharkeynleey, kana kooban Cabir dhan 20X40-Mitir Loto L 0160,0162-UZ, lehna Warqadda Mulkiyadda L.152/17/2008 ee Tr.19/11/2008, kana soo Baxday Dowladda Hoose ee Muqdisho Waxda Dhulka, Jahoyinkiisu kala yihiin: Waqooyi Jid, Bari Jid, inta kale dhul Dad, Waxaan Dhulkaas ka gaday Khadiijo Axmadey Maxamad, Soomaali ah, degan Kenya, Waxaan uga gaday lacag dhan \$2.000 ( Labo Kun Dollar Mareykanka ah) gacan saar ah kala bax ah, wuxuu Dhulkaasi ka madax bannaan yahay deyn, Rahan, iyo sheegasho cid kale, waxii mulkiyadiisa ku yimaadana anigaa damaana qaadaya sidaa darteed waxaa mulkiyadda Dhulkaas ku wareegtay Mr/Mrs:Khadiijo Axmadey Maxamad. Waxaana Markhaatiyaal ka ahaa beecan:

1. C/llaahi Nuur Cali \_\_\_\_\_

2 Cusmaan Xuseen Axmad \_\_\_\_\_

3. Maxamad Aadan Xasan \_\_\_\_\_

Iska gadaha

Cumar Xuseen Axmad

Gataha

Khadiijo Axmadey Maxamad

### Xafiiska Nootaayo Banaadir

Saxiixa la Sugay

REF 7470 /010

Anigoo ah Xafiiska Nootaayo Banaadir Dr.C/raxman Maxamud Cali(timacadde) ee ku yaala Degmada Wadajir Km4 Waxaan Halkaan ku Sugayaa in Saxiixa sare ku qoran uu yahay kii dhabta ahaa ee Iska gadaha Cumar Xuseen Axmad iyo markhaatiyaasha C/llaahi Nuur Cali & Cusmaan Xuseen Axmad & Maxamad Aadan Xasan Waxayna ku saxiixeen Xafiiska dhexdiisa iyadoo aan cidina qasbin qowl iyo ficilba, kadib markii ay iska Akhriyeen, waxaan ku qoray oo ka saxiixay diiwaanka guud ee nootaayadda.

**Xaafiiska Nootaayo Banaadir**

Dr.C/raxmaan Max'uud Cali (Timacadde)





**FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA**


**Tr. 08/02/2025**

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **IFRAAX MAXAMED NUUR** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1383/T.P.N/25, Tr. 05/02/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca La Wakiishaha</b>	IFRAAX MAXAMED NUUR
<b>La Wakiishay</b>	
<b>Taariikhda Wakaalada</b>	05/02/2025

**La Wakiishe:** Aniga oo ah **IFRAAX MAXAMED NUUR**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

FG. Wakaaladaan Waxaan Geeyey Waddani Waxayna KU wareejiyen Dhul



**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Dr. Maxamed C/laahi Maxamed**

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**IFRAAX MAXAMED NUUR**